Latvia

# XUQUUQDAADA IYO WAAJIBAADKAAGA QAABILAADA INTA LAGU JIRO NIDAAMKA MAGANGALYADA XADKA



Macluumaadkan adiga ayuu kugu saabsan yahay haddii:

- waxaad tahay qof weyn (kaweyn 18 sano jir)
- waxaad codsatay magangalyo caalami ah (sidoo kale loo yaqaan magan-galyo) gudaha Latvia oo imika waxaad tahay codsade magangalyo caalami ah.

SOMALI

# TUSMADA



| | |
|---|---|
| Waa maxay soo-dhaweyn? | 3 |
| Halkee ayaad degi doontaa? | 6 |
| Maxaad heli doontaa? | 7 |
| Xuquuqda daryeel caafimaad | 8 |
| Xuquuqda waxbarasho ee carruurta | 11 |
| Casharada luuqada iyo tababarka farsamada gacanta | 12 |
| Waa Maxay Xuquuqaha Kale Ee Aad Ku Leedahay Halka Aad Degan Tahay? | 13 |
| Shuruudaha codsadaha lagu xidhi karo | 14 |
| Waa Maxay Waajibaadkaaga Soo Dhaweynta? | 15 |
| Maxaa dhacaya haddii aanad u hogaansamin waajibaadkaaga? | 16 |
| Maxaa dhacaya haddii aad u safartid waddan EU+ ah oo kale bilaa fasaxa masuuliyiinta? | 17 |
| Waxaad ka qaadan kartaa rafcaan maamulka | 18 |
| Waxaad heli kartaa caawimo sharci | 19 |
| Faahfaahinta meelaha lagala xidhiidhi karo | 20 |

## WAA MAXAY SOO-DHAWEYN?

Soo-dhaweyn waa taageerada aad heshid codsade ahaan inta aad sugaysid in masuuliyiintu soo gabogabeeyaan baadhitaanka codsigaaga magangalyada caalamiga ah. Waxa kujira xuquuqaha iyo waajibaadka lagu sharxay buug yarahan.

Gudaha Latvia, hay'adaha mas'uulka ka ah qaabilaadda waa Ilaalada Xuduudaha Dowladda iyo Xafiiska Arrimaha Dhalashada iyo Socdaalka. Hay'adda mas'uulka ka ah baaritaanka codsigaaga magangelyo waa Xafiiska Arrimaha Dhalashada iyo Socdaalka.

Saraakiisha Ilaalada Xuduudaha Dowladda waxay ku weydiin doonaan inaad xaqiijiso oo saxiixdo inaad heshay macluumaadka lagu bixiyay buug-yarahaan. Haddii wax aanay kuu caddayn, fadlan weydii saraakiisha Ilaalada Xuduudaha Dowladda.



**Adigu waad ku badqaba waddankan.**

Inta aad joogto, saraakiisha Ilaalada Xuduudaha Dowladda waxay ku siin doonaan macluumaad ku saabsan adeegyada qaabilaadda iyo taageerada aad heli karto, iyadoo ku xiran xaaladdaada.



Waxaad weydiin kartaa haayadaha kale macluumaadka iyo caawimada bilaa lacagta ah. Waxaad ka heli kartaa liiska haayadaha dhammaadka buug yarahan.



**Turjumaan** ayaa kaa caawin doona inaad la xidhiidhid shaqaalaha ee shaqaalaha ama cadeynayso masuulka ay khusayso. Turjumaanku lama wadaagi doono shay aad tiraahdid cid kasta oo kale.

**Warqadani waxay sharxaysaa xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga qaabilaada inta lagu jiro nidaamka magangalyada xadka. Waxaad ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan ilaalinta caalamiga ah ee nidaamka magangalyada xadka iyo shuruucda la raacayo buuga kale oo gaara.**

**Adigu waxaad imika joogtaa Latvia  kaasoo ah waddan ka tirsan EU+. Waddamada EU+ waa:**

- 27-ka Dowladdood ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czechia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo

- 4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway, Switzerland.

## Fiiro gaar ah!

Codsadayaashu waxay leeyihiin xuquuqo iyo waajibaad soo-dhaweyn oo isku mid ah dhammaan waddamada EU+ ah.

Shuruucdani waxay khuseeyaan codsashada magangalyo iyo u safrida waddamada EU+ ee kale.

- **Waa inaad ka diiwaangelisaa codsiga magangelyo waddanka EU+ ee ugu horreeyay ee aad timid,** haddii maasuliyiintu aanay kuu sheegin wax kale.

- **Kaliya hal waddan oo EU+ ah ayaa ka masuul ah inuu baadho codsigaaga magangalyo.** Masuuliyiinta gudaha Latvia ayaa raaci nidaamka si loo go'aamiyo in wadan EU+ ah kamasuul yahay codsigaaga mangan-galyo.

- **Waa inaad joogtaa Latvia. Uma safri kartid wadan EU+ oo kale bilaa fasaxa masuuliyiinta.** Haddii aad tagtid, waxa jiri doona cawaaqib xun. Nidaamkaaga magangalyada ee Latvia waa la joojin doonaa oo codsigaaga waxa loo tixgalin doonaa in laga noqday ama la diiday. Xuquuqdaada dhaqdhaqaaqa dalka kale ayaa la xaddidi karaa ama waa lagu xidhi karaa oo adeeggyada soo-dhaweynta ayaa la joojin karaa.

## HALKEE AYAAD DEGI DOONTAA?

Masuuliyiinta ayaa go'aamiyey in codsigaaga magangalyada caalamiga ah lagu baadho nidaamka magangalyada xadka.

Inta lagu jiro nidaamkaaga magangalyada xadka **waa innaad degtaa meel gaara oo loogu talogalay.**

**Waa innaad raacdaa shuruucda goobtaasi oo joogitaankaaga meeshaasi gaarka ah waxa laga yaabaa si loo hubin doonaa joogto.**

Ilaalada Xuduudaha Dowladda waa inay si qoraal ah (luqad aad fahmayso) kuugu wargelisaa go’aanka kugu waajibinaya inaad degto goob cayiman. Waa innay kuu sheegaan xuquuqdaada, waajibaadkaaga iyo cawaaqib xumada ka dhalan karta haddii aadan ixtiraamin go’aanka.





Waxaad rafcaan ka qaadan kartaa go'aanka ku saabsanmeesha aad degaysid ee laguu asteeyey.

Waxaad Ilaalada Xuduudaha Dowladda waydiisan kartaa in laguu oggolaado inaad meel kale sii joogto muddo xaddidan haddii ay jiraan duruufo gaar ah oo ka reeban. Masuuliyiintu waxay ansixin karaan codsigaaga ama ma oggolaan karaan. Haddii codsigaaga la diido, waad racfaan ka qaadan kartaa go’aankan.

## MAXAAD HELI DOONTAA?

Inkastoo maamulku baadho codsigaaga magangalyo caalami ah, iyadoo ay ku xidhan tahay xaaladaada shakhsi iyo dhaqaale, waxaad heli doontaa:



- hoy



- agabka nadaafada gaarka ah



- cunto



- dhar



- lacag aad u isticmaasho kharashaadka maalinlaha ah

Masuuliyiinta waxay ku weydiin doonaan su'aalo si ay si fiican ugu fahmaan duruufahaaga shakhsi iyo dhaqaale.

# XUQUUQDA DARYEEL CAAFIMAAD



Maamulku waxay hubin doonaan inaad heshay **daryeelka caafimaad ee daruuriga ah**. Tani waxa kujiri kara tusaale, booqashooyinka kalkaaliso ama dhakhtar, baadhitaanka xanuunada darran iyo xaaladaha lala noolaado cudur, daaweynta uu qoray dhakhtar iyo caawimada caafimaadka maskaxda.

**Haddii aad leedahay dhibaato caafimaad, u sheeg shaqaalaha.**

Haddii aad ku jirto xaalad caafimaad oo degdeg ah ama aad qabto dhaawac u baahan daaweyn degdeg ah, u sheeg saraakiisha arrintaas ama wac lambarka gurmadka degdegga ah ee bilaashka ah 112.



Waxaa lagugu samayn doonaa baaritaan caafimaad oo uu sameeyo dhakhtar ama kalkaaliso. Waxay qiimeyn doonaan xaaladdaada caafimaad waxayna ku siin doonaan gargaar. Waxay ku waydiin doonaan su'aalo ku saabsan xaaladahaaga caafimaad ee hadda ama kuwii hore, taariikhda tallaalladaada, iyo dawooyinka aad qaadanayso. Sidoo kale waxay ku waydiin doonaan wixii dhaawacyo, xanuun, xaalado caafimaad, ama walaacyo caafimaad ah oo aad qabto.

Gudaha Latvia, ka dib marka codsigaaga magangelyo la diiwaangeliyo oo lagu dejiyo hoy, waxaa lagugu samayn doonaa baaritaanka qaaxada, kaas oo waajib ah.

## Waxaad xaq u leedahay inaad hesho taageero gaar ah haddii aad leedahay baahiyo gaar ah.







**Wargali shaqaalahaaga haddii:**

- aad dhaawacan tahay ama xanuunsanayso
- aad uur leedahay ama aad u malaynayso inaad uur leedahay
- waxaad leedahay xubno qoyskaaga ka mid ah oo u baahan caawimo gaar ah
- Waxaad qabtaa naafanimo (tusaale ahaan, dhaqdhaqaaq xaddidan, maqalka oo daciif ah, ama aragga oo liita)
- aad si joogto u dareento cadho badan, welwelsan tahay ama walaacsan tahay, seexan weydo ama aad waajahayso fikirro xun
- waxaad la ildaran tahay dhibaato ama jirdil hore
- aad dareento inaanad ammaan ahayn, dhibtoonayso ama aad ka baqayso qof, ha ahaado qof ajnabi ah ama qof aad taqaan
- lagugu qasbay ama lagugu qasbayo inaad samayso waxyaabo aadan rabin
- aad dareento inaanad badqabin sababtoo ah diintaada, qofka aad jeceshahay, sida aad u labisato ama u dhaqanto

Taageero gaar ah waxaa lagu siin karaa oo keliya haddii saraakiisha Ilaalada Xuduudaha Dowladda ama Xafiiska Arrimaha Dhalashada iyo Socdaalka ay ogyihiin baahiyahaaga gaarka ah.





Saraakiisha Ilaalada Xuduudaha Dowladda iyo Xafiiska Arrimaha Dhalashada iyo Socdaalka waxay ku waydiin doonaan su'aalo si ay:

- u qiimeeyaan **baahiyahaaga gaarka ah**
- u aqoonsadaan **nooca taageerada gaarka ah ee** kugu habboon.

Taas waxaa loo yaqaan **qiimeynta baahiyaha gaarka ah.**

Turjumaan ayaa kaa caawin doonaa inuu kugula xidhiidho luuqad aad fahmayso, haddii ay daruuri tahay.



**Haddii aad u baahan tahay taageero gaar ah, mar walba la xiriir saraakiisha Ilaalada Xuduudaha Dowladda ama Xafiiska Arrimaha Dhalashada iyo Socdaalka.**

Waxaad taageeradan heli doontaa ilaa inta ay maamulku u arkaan inaad u baahan tahay.

Waxaad ku kalsoonaan kartaa dhakhaatiirta, kalkaaliyeyaasha, iyo saraakiisha Ilaalada Xuduudaha Dowladda iyo Xafiiska Arrimaha Dhalashada iyo Socdaalka, waxaana lagugu dhiirigelinayaa inaad si xor ah ula hadasho. Dhammaan macluumaadka waa la asturi doonaa, taasoo macneheedu tahay lalama wadaagi doono dadka kale iyadoon lagaala heshiin.

Kaliya waxa ka reeban marka noloshaada ama nolosha qof kale ay halis ku jirto.

# XUQUUQDA WAXBARASHO EE CARRUURTA

Dhammaan carruurta, wiilal iyo gabdho ka yar da'da 18 sano, waxay xaq u leeyihiin waxbarasho.

Waxay heli doonaan taageero, tusaale ahaan, barashada luqadda qaranka.



Gudaha Latvia, magangelyo-doonayaashu waxay heli karaan waxbarashada xannaanada carruurta laga bilaabo da'da 5 sano, iyo sidoo kale fursad ay ku helaan waxbarashada aasaasiga ah (illaa da'da 18 sano) iyo waxbarashada dugsiga sare.

**Waalidiinta waxaa saaran waajibka inay hubiyaan waxbarashada carruurtooda, oo ay ku jirto la shaqaynta hay'adda waxbarashada.**

# FASALADA LUUQADA IYO TABABARKA XIRFADAHA

Iyadoo ku xidhan xaaladdaada, maamulku waxay kaa codsan karaan inaad ka qaybgasho:

- koorasyada luuqada;
- koorasyo ku saabsan bulshada aad la nooshahay;
- koorasyo aad ku baranayso xirfado cusub.



Shaqaaluhu waxay ku wargelin doonaan koorsooyinkan iyo goorta aad bilaabi karto.

**Inta codsigaaga magangelyo lagu baarayo iyadoo la raacayo habraaca xuduudda, laguma oggola inaad shaqeyso.**

## WAA MAXAY XUQUUQAHA KALE EE AAD KU LEEDAHAY HALKA AAD DEGAN TAHAY?



- **Innaad ilaalisid badqabka:** qofna, xataa shaqaalaha, looma oggola inuu kuu hanjabo, caayo, ama dhibaateeyo.



- **Innaad la joogtid saygaaga, xaaskaaga, carruurtaada iyo walaalahaga kayar 18 ama qaraabo qof weyn ah oo u baahan daryeel joogto ah.**
- **La joog qaraabadaada,** haddii aad tahay qof weyn oo u baahan daryeel joogto ah.



- Hel caawimaad **si aad ula xidhiidho** qoyskaaga oo**iskuday innaad heshid iyaga, haddii aadan garanayn meesha ay joogaan**.

**Waxaad soo gudbin kartaa cabasho rasmi ah haddii aad aaminsan tahay in:**



- Mid ka mid ah shaqaalaha uu ku hanjabay, ku aflagaadeeyay, ama ku waxyeelleeyay.
- Haddii ficillada ama ficil la’aanta sarkaal ay kuu geysteen dhibaato;
- Xuquuqdaada aasaasiga ah iyo baahiyahaaga aasaasiga ah lama daboolayo.

Masuuliyiinta Ilaalada Xuduudaha Dowladda ayaa kugu wargalin doona sida aad u samaysan karto cabasho rasmi ah.

Mar walba waad weydiin kartaa maamulka, hay’adaha aan dowliga ahayn ama Xafiiska Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR) si aad u hesho macluumaad dheeri ah.

**Fiiro gaar ah!** Haddii aadan ixtiraamin go'aanka ku saabsan inaad degtid meeshaas gaarka ah iyo xaddidaadaha lagugu soo rogay, isla markaana ay jirto khatar ah inaad mar kale baxsato, waa laguu xiri karaa.

## SHURUUDAHA CODSADE LAGU XIDHI KARO

Xadhig macneheedu waa in lagu geeyo xarun gaara oo aanad si xor ah u socon karin. Masuuliyiintu waa inay haystaan sabab saxa oo ay kugu xidhaan. Waa inay hubiyaan in aan xalkale macquul ah laheyn xaaladaada. Maamulku Ilaalada Xuduudaha Dowladda waxay tixgelin doonaan xaaladdaada gaarka ah ka hor inta aysan go'aan gaarin.



Sababaha loo haynayo waxay noqon karaan, tusaale ahaan:

- qodobbada muhiimka ah ee codsigaaga magangalyo (tusaale, aqoonsigaaga) lama xaqiijin karo adigoon lagu hayn.
- maad ixtiraamin waajibaadka inaad degtid goob gaara, waxaana jirta halis inaad baxsatid markale iyo masuuliyiinta oo aan kulasoo xidhiidhi karin
- waxaad heshay go'aan in laguu gudbiyo wadan kale oo EU+ ah kana masuula baadhista codsigaaga magan-galyo waxaana jirta khatar inaad baxsato ah kahor gudbinta
- waxaad keenaysaa halis amni.

haddii lagu hayo, waxaad qaadan kartaa racfaan. Waxaad codsan kartaa caawimo sharci oo bilaasha iyo matalaad.

# WAA MAXAY WAAJIBAADKAAGA SOO DHAWEYNTA?





**Hoos waxa ah qaar kamida waajibaadka ay tahay inaad u hogaansantid.**

- ✅ Raac shuruucda waddankan.
- ✅ Joog Latvia  oo ha u safrin dal kale oo EU + ah adigoon helin oggolaanshaha maamulka.
- ❌ Haka tagin bilaa fasax goobta gaarka ah ee ay masuuliyiintu ku yidhaahdeen waa inaad degtid.
- ✅ Si dhammaystiran ula shaqee maamulkamagaca maamulka ama ku daa maamulka guud si ay u muujiyaan in codsadayaashu ay tahay inay la shaqeeyaan dhammaan maamulka.oo raac tilmaamahooda.
- ✅ Ixtiraam xeerarka goobta aad degtid doontaan.
- ✅ Ixtiraam dadka kale ee degan, shaqaalaha iyo shakhsiyaadka kale.
- ✅ Ku wargali maamulka*magaca maamulka*waxyaabaha ku saabsan macluumaadkaaga halka lagala soo xidhiidhayo (lambarka taleefanka, iimaylka), iyo wixii isbeddel ah, si ay mar walba kuula soo xidhiidhi karaan.

## MAXAA DHACAYA HADDII AANAD U HOGAANSAMIN WAAJIBAADKAAGA?

Maamulka Ilaalada Xuduudaha Dowladda waxay qiimeyn doonaan xaaladdaada waxaana laga yaabaa inay go’aamiyaan in la dhimo ama la joojiyo nooc ka mid ah taageerada. Maamulka Ilaalada Xuduudaha Dowladda waxay kuugu soo gudbin doonaan go’aankaas qoraal ahaan waxayna caddeyn doonaan taageerada ay dhimayaan ama joojinayaan.



### Fiiro gaar ah!

**Waxaad heli kartaa caawimo yar**, tusaale ahaan, haddii:

- waxaad tagtaa bilaa fasax goobta ay masuuliyiintu ku yidhaahdeen waa inaad joogtaa
- aanad la shaqeyn maamulka
- aad ka been sheegtid meelaha dhaqaale kaasoo galo
- aad jabisid shuruucda goobta aad degan tahay
- waxaad ka tagtay dalkan bilaa fasax oo waxa lagugu celiyey dalkan.


**Waxaad waayi kartaa caawimada aad helaysid** ihaddii aad noqotid rabshadle, haddii aad u hanjabtid dadka kale ama haddii aad jabisid sharciga goobta aad adigu degan tahay markasta ama si darran. Xaaladani, booliiska ayaa sidoo kale la wici karaa si ay u farogaliyaan.



**Fiiro gaar ah!** Haddii aanad ixtiraamin waajibaadka ah innaad degtid goobta gaarka iyo xannibaadaha lasoo rogay, oo ay masuuliyiintu ka baqaan innaad baxsatid marlabaad:

- waa lagu xidhi karaa
- Nidaamkaaga magangalyada ee waa la joojin doonaa oo codsigaaga waxa loo tixgalin doonaa in laga noqday ama la diiday. Tani waxay ka dhigan tahay inaad waayi karto xaaladdaada codsade ilaalinta caalamiga ah iyo dhammaan xuquuqaha la xidhiidha.

## MAXAA DHACAYA HADDII AAD U SAFARTID WADDAN EU+ OO KALE BILAA FASAXA MASUULIYIINTA?




**Gudaha Latvia:**

- Nidaamkaaga magangalyada ee waa la joojin doonaa oo codsigaaga waxa loo tixgalin doonaa in laga noqday ama la diiday.

**Waddanka EU+ ee aad u safartay bilaa fasax:**

- masuuliyiintu waxay go'aansan karaan inay kugusoo celiyaan waddanka aad ka tagtay bilaa fasax

Laga bilaabo marka maamulku kugusoo wargeliyaan go'aanka lagu celinayo, waxaad waayi doontaa xuquuqaha qaarkood, tusaale ahaan:

- ma **heli doontid adeeggyo badan iyo noocyada caawimo**
- laguuma **oggolaan doono inaad ka shaqayso**
- laguuma **oggolaan doono inaad kaqeybgashid casharada luuqada ama casharo lagu barto xirfado cusub.**

## WAXAAD KA QAADAN KARTAA RAFCAAN GO'AANKA MAAMULKA



Haddii masuuliyiintu Ilaalada Xuduudaha Dowladda go'aamiyaan inay xaddidaan xuquuqdaada codsade ahaan oo aad aamisan tahay in tani tahay cadaallad daro, **waxaad ka qaadan kartaa rafcaan go'aanka**.

Waxaad ka qaadan kartaa rafcaan haddii maamulka Ilaalada Xuduudaha Dowladda ay go'aamiyaan:

- si loo yareeyo ama loo joojiyo caawimada soo-dhaweynta ee lagu siiyey;
- in aannay ansixin codsigaaga innaad si kumeelgaadha uga tagtid meesha gaarka ee laguu asteeyey ;
- lagugu waajibiyey innaad degtid goob gaara oo laguu asteeyey;
- si laguu xidho.

Haddii aad u safartay waddan EU+ oo kale bilaa fasaxa masuuliyiinta oo aad wayday xuquuqo soo-dhaweyn gaara halkaasi, waxaad kaga qaadan kartaa rafcaan go'aankan dalkaasi.

Marka masuuliyiinta Ilaalada Xuduudaha Dowladda  Latvia go'aamiyaan inay yareeyaan ama joojiyaan caawimada soo dhaweynta ee lagu siiyey sababtoo ah xaalado lagu sharxay bogga 16, boggawaxaad leedahay xuquuqo gaara. Tusaale ahaan, waxaad awoodi doontaa inaad la kulantid dhakhtar ama kalkaaliye, kaalmo caafimaad, waxoogaa taageero ahMS waxay ku dari tusaale, cuntoiyo goob aad seexatid oo ay go'aamiyeen maamulku.

Nooca caawimada waxay ku xidhnaan doontaa xaaladahaaga iyo baahiyahaaga gaarka ah.

Marka maamulka waddan EU+ oo aad u safartay bilaa fasax go'aamiyo inuu joojiyo caawimada soo-dhaweynta lagu siiyey, nooca caawimada aad wali heli doontaa waxay ku xidhnaan doontaa xaaladaada iyo baahiyahaaga gaarka ah.

## WAXAAD HELI KARTAA CAAWIMO SHARCI



maamulka si loo xaddido xuquuqdaada soo-dhaweynta kahor garsoore, waxaad heli kartaa doontaa caawimo sharci oo bilaash ah iyo matalaad, ku xidhan xaaladaada.

Tani macneheedu waa in lataliye sharci ku caawin doono. Lataliyayaasha ama looyarada sharci ayaa ku siiya caawimo sharci kahor garsoore, difaaca danahaaga oo ka madaxbanaan maamulka iyo garsooraha.

Waxaad sidoo kale la tashan kartaa lataliye sharci ama looyar adigu aad isku qabto kharashkiisa.




Maamulka Ilaalada Xuduudaha Dowladda ayaa kusoo ogeysiin doona sida looga qaato rafcaan go'aanka.

Waxaad markasta weydiin kartaa masuulyiinta, haayadaha aan dawliga ahayn ama UNHCR wixii macluumaad muhiima, oo ay kujiraan caawimada sharci iyo matalaada bilaashka ah.

# FAAHFAAHINTA HALKA LAGALA XIDHIIDHAYO

Haddii aad qabtid wax su'aala ama aad u baahan tahay taageero inta lagu jiro joogistaada, waxaad la hadli kartaa shaqaalaha ka tirsan:

## maamulka soo dhawaynta

**Ilaalada Xuduudaha Dowladda**
Cinwaan: Rūdolfa iela 5, Riga
tel.: +371 67913300
e-mail: pasts@rs.gov.lv
https://www.rs.gov.lv/

**Xafiiska Arrimaha Dhalashada iyo Socdaalka**
Cinwaan: Čiekurkalna 1. līnija 1, k-3, Riga
tel.: +371 67209400
e-mail: pasts@pmlp.gov.lv
https://www.pmlp.gov.lv/

Waxaad sidoo kale laxidhiidhi kartaa ururadan, si aad u hesho su'aalaha la xidhiidha:

## taageerada caafimaad



**Adeegga Caafimaadka Qaranka**
Cinwaan: Cēsu iela 31 k-3, entrance 6, Riga
tel.: +371 80001234
e-mail: nvd@vmnvd.gov.lv
https://www.vmnvd.gov.lv

## taageerada bulsheedka



**Khadka mideysan ee bilaashka ah ee xaaladaha qalalaasaha: 116 123**
Waxaa loogu talagalay bixinta taageero nafsi iyo shucuureed oo loogu talagalay dadka waaweyn, sidoo kale wuxuu bixiyaa fursad lagu qabsado kulammo la-talin oo bilaash ah oo lala yeesho cilmi-nafsi yaqaan. Taageerada waxaa lagu heli karaa luqadaha Latvian, Ingiriisi, iyo Ruush.
Tel.: 116 123

## latalin sharci, kaalmada iyo matalaada



Maamulka Maxkamadaha
Cinwaan: Antonijas iela 6, Riga
tel.: +371 67063800
e-mail: pasts@ta.gov.lv
https://www.ta.gov.lv/

| | |
|---|---|
| **UNHCR (Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Qaxootiga)** | Cinwaan: Antonijas iela 9, Riga<br>phone.: +46 10 101 28 00<br>e-mail: swest@unhcr.org<br>https://www.unhcr.org/ |
| **Hay'adda Isdhexgalka Bulshada<br>Xarunta Adeegga Hal-Goob** | Cinwaannada xarumaha adeegga macaamiisha ee Xarunta Adeegga Hal-Goob:<br>Raiņa bulvāris 15, Riga, tel.: +371 26959706<br>Rožu iela 6, Liepāja, tel.: +371 22811020<br>Ģimnāzijas iela 11, Daugavpils, tel.: +371 29557630<br>https://livelatvia.lv/ |
| **Xarunta Xuquuqda Aadanaha ee Latvia** | tel.: +371 67039290<br>e-mail: office@humanrights.org.lv<br>https://cilvektiesibas.org.lv/ |

Haddii aad ku jirto xaalad caafimaad oo degdeg ah ama aad ku jirto khatar, waxaad wici kartaa lambarkan gurmadka degdegga ah:



**Adeegyada caafimaadka degdegga ah iyo booliiska: 112**

# QORAALADAYDA

Buug-yarahan waxaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad oo keliya. Isagu ma abuuro xuquuq iyo waajibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalkan, waxaana EUAA oo keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, taas oo loogu talagalay dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas'uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas'uul ah. EUAA iyo cid kasta oo ku shaqaysa magaca EUAA midna mas'uul kama aha isticmaalka laga yaabo in laga sameeyo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025